QAYBTA CAAFIMAADKA

Borotiinka jeermis Dilaha ah ee jirka (mAb) xaashida xaqiiqda

Ku daaweynta borotiinka jeermis dilaha ah ee jirka (mAb) wuxuu ka caawin karaa kahortaga xanuunka daran waxayna yareysaa tirada u waayida nolosha sababta COVID-19.

Daaweyntaan waxaa hadda laga heli karaa bixiyeyaal bbadan oo gobolka oo dhan, taas oo fududeyneysa in la helo.

Maxay tahay sababta loo qaato daaweynta mAb?

- Aad ayay waxtar ugu leedahay kahortagga isbitaal dhigista ka dhanka ah COVID-19 iyo yareynta horumarka COVID-19 ee kuwa u-bayla noqday.
- Waxay yaraynaysaa khatarta dhimashada.
- Waa saameyn la cadeeyey oo ka dhan ah nooca Delta.

Muxuu yahay unugyada difaaca borotiinka jirka ee monoclonal?

Unugyada difaaca jirka ee monoclonal (mAbs) waa unugyo difaac ah oo lagu sameeyay shaybaar kaas oo ka reebaayo fayraska inuu galo unugyadaada waxayna yareysaa darnaanta cudurka iyo isbitaal dhigista.

Yaa u qalma daaweynta mAb?

Shakhsiyaadka 12 iyo kasii weyn ee uu miisaankoodu yahay ugu yaraan 88 rodol (40 kilogaram) iyo kuwaas oo:

1. Baaritaankooda ku aadan COVID-19 noqday mid togan

- Ku jiro 10-kii maalmood gudahooda marka aad isku aragtay calaamadaha
- Leh calaamado khafiif ah ama dhexdhexaad ah
- Aan isbitaal la dhigin tusaale ahaan, lagu daweyn karo guriga oo aan ku jirin daaweynta ogsajiinta
- Waxaana loo tixgeliyaa bukaanada khatarta sare kujira.

AMA

2. U-bayla noqday COVID-19 ama khatar sare ugu jira u-bayla noqosho oo ay ugu wacantahay kiisas ka jira goob hay'ada (sida guryaha dadka lagu daryeelo) OO aan si buuxda loo tallaalin WAXAANA loo tixgeliyaa khatarta sare. Dadka sida buuxda u tallaalan ayaa sidoo kale u qalma xaaladaha qaarkood.

Maxaan filan karaa haddii aan helo daaweynta difaaca unugyada borotiinka jirka ee monoclonal?

Daaweynta difaaca unugyada borotiinka jirka ee monoclonal waa dareere lagu bixiyo iyadoo la adeegsanaayo irbad la geliyo xididka (faleebo) ama maqaarka hoostiisa (hoostiisaba). Daryeel bixiyahaaga caafimaadka ama goobta aad ka heli doonto daaweynta ayaa kuu sharxi doonta daaweynta aad heli doonto. Ku aadan labada habraacba, cirbadaha waxaa isticmaalasyo xirfadle caafimaad oo tababaran.

Haddii aadan tallaalneyn, waa inaad sugtaa 90 maalmood kadib daaweyntaada si aad u hesho tallaalka.

Qaadashada daawada mAb ma badelayso muddada karantiilka iyo go'doominta loo baahanyahay. Sii wad inaad raacdo hagitaanka ay bixiso waaxda caafimaadka deegaankaaga.

Faleenbo (xididkaaga dhexdiisa)

Waa inaad aadaa xarunta faleenbo xirka oo ay joogaan shaqaale si gaar ah u tababaran si aad ugu hesho daawadaunugyada difaaca borotiinka jirka ee monoclonal si faleenbo ahaan ah.

Daaweyntan waxa lagu bixiyaa dareere ahaan xididkaaga iyadoo la adeegsanaayo cirbad (xididka gudaha). Waxay qaadan doontaa 20 - 50 daqiiqo, iyo suurtogalnimada in ka badan, si loo dhammeystiro faleenbada. Waxaa lagu waydiin doonaa inaad sugto saacad kale kadib faleenbada si loo hubiyo ina aadan lahayn waxyeelooyin halis ah.

Qeybta hoose (maqaarkaaga hoostiisa)

Haddii aad qaadato daawada unugyada difaaca borotiinka jirka ee monoclonal qeyb hoosaadka, waxaad heli doontaa afar tallaal oo leh cirbad gaaban oo la gelinaayo maqaarkaaga hoostiisa afar meelood oo kala duwan oo jirkaaga ah. Kuwaas waxaa badanaa ka mid ah dhabarka gacmaha, caloosha iyo/ama bowdada. Qaadashada dhammaan afarta tallaal waxay qiyaastii qaadaneysaa 1-3 daqiiqo. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad sugto hal saac kadib tallaaladaada si loo hubiyo ina aadan lahayn waxyeelooyin halis ah.

waxyeellooyinka

Iyadoo leh daaweynta midkood, waxaa laga yaabaa inaad xoogaa raaxo darro ah kala kulanto goobta la duray. Tani waa wax caadi ah waxayna ku dhamaneysaa maalmo yar gudahood.

Dadka qaar ayaa laga yaabaa inay dareemaan falcelin fudud oo ay ka mid yihiin:

- Xanuun kooban
- Dhiigbax fudud
- Nabaro yeelasho
- Xanuunka jirka
- Bararsan

Kuwani waxay la mid yihiin waxa aad la kulmi karto markaad dawooyinka kale ku qaadanayso duritaanka, sida tallaalka Covid-19 ama tallaalka hargabka. Kuwani waxay ku dhammaan karaan muddo dhowr maalmood.

Haddii aad dareento isbadello sida xanuun, casaan, dheecaan, kabuubyo, xiirid, ama calaamado kale oo ku khuseeya agagaarka dhaw ee goobtaada, wac bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

Falcelinta xasaasiyadeed ee naadirka ah

Waa naadir, laakiin dadka qaarkiis waxay ku yeelan karaan falcelin xasaasiyadeed oo daran oo ku aadan daawada unugyada difaaca borotiinka jirka ee monoclonal. Qof kasta waxa laga codsadaa in uu sugo ugu yaraan hal saac daaweynta kadib si loo hubiyo in aanay jirin falcelin xasaasiyadeed oo halis ah sidaas darteedna caawimaad ayaa lagu siin karaa isla markiiba haddii loo baahdo.

Falcelinada kale ee halista ah

Tiro aad u yar oo dad ah ayaa laga yaabaa inay la kulmaan falcelin naadir ah, laakiin falcelin halis ah ku ah daaweynta. La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama raadso daryeel caafimaad haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadahan aadka u sii daran maalmahaaga daaweynta kadib:

- Calool xanuun (lallabbo, matag, ama shuban)
- Cuncun, barar, finan, ama qawid
- Dawakhsanaan ama cadaadiska dhiiga oo hooseeya
- Isbadelada garaaca wadnahaaga
- Calaamad kasta oo cusub ama kasii xumaaneysa

- Neefsashada oo adkaato
- Daciifnimo
- Wareer

Noocyada kala duwan ee daawooyinka unugyada difaaca borotiinka jirka ee monoclonal

Casirivimab/Imdevimab- Isku darka laba kamid unugyada difaaca jirka si ay ugu caawiyaan jirkaaga ka jawaab celinta fayraska COVID-19 haddii aad baaritaanku noqdo mid togan ama in loo isticmaalo si looga hortago xanuun haddii aad u-bayla noqotay caabuqa COVID-19. Daawadan waxaa lagugu siin karaa faleenbo IV ah (xidid dhexdii) ama sida afar tallaal oo maqaarka hoostiisa ah. Waxaad u baahan doontaa in lagu kormeero muddo 1 saac daaweynta kadib.

Bamlanivimab/Etesivimab- Isku darka laba kamid unugyada difaaca jirka si ay ugu caawiyaan jirkaaga ka jawaab celinta fayraska COVID-19 haddii aad baaritaanku noqdo mid togan ama in loo isticmaalo si looga hortago xanuun haddii aad u-bayla noqotay caabuqa COVID-19. Daawadan waxa kaliya lagugu siin karaa faleenbo IV ah (xidid dhexdii). Waxaad u baahan doontaa in lagu kormeero muddo 1 saac daaweynta kadib.

Sotrovimab- Hal unugyada difaaca borotiinka jirka ah si ugu caawiyaan jirkaaga inuu u jawaabo caabuqa COVID-19 haddii uu baaritaanka noqdo mid togan. Daawadan waxa kaliya lagugu siin karaa faleenbo IV ah (xidid dhexdii). Waxaad u baahan doontaa in lagu kormeero muddo 1 saac daaweynta kadib.

Waxa ay tahay in la fisho daaweynta kadib?

Daaweyntaada kadib waa inaad guriga aado, nasato oo aad daryeeshaa calaamadahaaga COVID-19 haddii aad leedahay. Haddii aad dhib ka qabtid halka lagaa siiyey cirbada, waxaad isticmaali kartaa cadaadin qabow maalinta daaweyntaada. Intaa kadib, diirsimaadka (sida suufka kuleylka) ayaa kaa caawin kara bogsiinta nabar kasta.

Dadka intooda badan uma baahan doonaan wax daaweyno dabagal oo dheeraad ah. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa kula hadli doona haddii ay u maleeyaan inaad hesho daaweyn dheeraad ah.

Waxaa laga yaabaa inaad bilowdo inaad dareento calaamadaha COVID-19 inay si dhakhso ah u soo hagaagayaan, ama waxa weli laga yaabaa inay qaadato wakhti kahor inta aadan bilaabin inaad bogsooto. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad la kulanto calaamadaha COVID-19 oo sii xumaanaya. Waa inaad isla markiiba raadsataa daryeel caafimaad haddii calaamadahaagu ay halis yihiin, oo ay kamid yihiin:

- Neef-ku-dheg
- Xanuun joogto ah ama cadaadis saaran xabadka
- Jahwareer cusub?
- Awood la'aanta lagu kaco ama lagu soo jeedo
- Midab barax ah, cawl, ama maqaarka midabka buluuga ah leh, dibnaha, ama sariiraha cidiyaha, iyadoo oo ku xiran midabka maqaarka.

Si aad ugu warbixiso waxyeellooyinka halista ah

1. Isla markiiba u sheeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka
2. Ugu warbixi waxyeellooyinkaaga FDA MedWatch www.fda.gov/medwatch ama wac

   1-800-FDA-1088 ama wac 1-844- 734-6643.

Qofka loo soo waco Su'aalaha

Haddii aad hayso su'aalo ama walaacyo ku saabsan daaweyntaada, wac bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama rugta caafimaadka ama farmashiyaha halkaas oo aad ka qaadatay daaweyntaada.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.